



Tilmaamaha Kaalmada Khidmadda

Maxay Tahay Kaalmada Khidmadda?

Brograamka Kaalmada Khidmadda Guddiga Nasashada iyo Beeraha Minneapolis (Minneapolis Park and Recreation Board Fee Assistance Program) waxay kaalmeysaa dadka daggan Minneapolis marka ay dhibaato kala kulmaan maaliyadda. Xaq u yeelashada brograamka waxaa la ogaan doonaa marka lala kulmo Tilmaamaha Dakhliga (Income Guidelines), lana buuxiyo arjiga iyo marka lagu soo lifaaqo warqadaha loo baahan yahay. Kaalmada khidmadda waxaa loogu talagalay qeybta hoggaaminta khidmadaha keliya, ma loogu talogelin saadka, khidmadaha dheeraadka, ama kharashka ka-qeybgelinta safarada dibadda.

Yaa dalban kara?

Dadka daggan Magaalada Minneapolis ee la yimaada caddeyn ku saabsan meesha ay daggan yahiin waxay xaq u leeyahiin Brograamka Kaalmada Khidmadda Nasashada (Recreation Fee Assistance Program). Fadlan waxaad Guddiga Nasashada iyo Beeraha Minneapolis ee Magaalada Minneapolis siisaa caddeyn meesha aad daggan tahay marka aad dalbanaysid.

Maxay yahiin talaabadaha lagu dalbado?

Buuxi arjiga Brograamka Kaalmada Khidmadda Nasashada (Recreation Fee Assistance Program) iyo la imow warqadaha ka hor inta aadan isku qorin fasalka. Arjiyada iyo warqadaha aan la dhamaystirin waa la joojin doonaa mana laga shaqeyn doono ilaa dhamaan laga soo dhamaystiro. Waxaad arjiga oo dhamaystiran iyo warqadaha lagaa codsaday ku soo celisaa goobta meesha laga bixiyo koorsada.

Maxay yahiin nooca warqadaha loo baahan yahay?

Waxaa loo baahan yahay in arjiga la soo raaciyo warqadaha soo socda, fadlan calaamee sanduuqa aad ku soo lifaaqi doontid. Fadlan dabool dhamaan nambarada Social Sekuritiga ka hor inta aadan ku lifaaqin.

- Koobiga dabada labada jeeg ugu dambeyay dhamaan dadka shaqeyay reerka oo SS# la daboolay ama
- Koobiga canshuur celinta federaalka sannadkii la soo dhaafay lana daboolo SS# ama
- Haddii aadan lahayn dakhli, aadan soo gudbinin canshuur celinta, ku soo lifaaq qoraal gaaban in aada lahayn dakhli.

Goormaan ogaan doonaa haddii ley ogolaaday?

Waxaa la ogaan doonaa, lana xaqiijin doonaa xaq u yeelashada muddo toban maalin la shaqeyo gudahooda laga bilaabo marka la helo arjiga. Guddinta arjiga ma aha in la xaqiijiyay kaalmada khidmadda ama diiwaan gelinta koorsada. Waxaa laguugu ogeysiin doonaa telefoon, email ama warqadaha lagu soo diro boostada haddii loo baahan yahay macluumaad dheeraad ah si looga shaqeyo codsigaada. Su'aalaha ku saabsan arjigaada kaalmada khidmadda ama foomamka diiwaan gelinta waa in loo gudbiyo Xarunta Nasashada (Recreation Center) meesha aad u gudbisay foomamka.

Dhamaan macluumaadkeyga ma ahaan doonaan qarsoodi?

Dhamaan macluumaadka loo gudbiyo Brograamka Kaalmada Khidmadda (Fee Assistance Program) si loo ogaado xaq u yeelashada waa qarsoodi.

Sidee ayaan u isticmaali karaa kaalmada haddii ley ogolaado?

Kaalmada waa hagaag sannadka kalendaraka la dalbaday. Waa in aad dib u dalbatid sannad kasta kalendaraka. Kaalmadaan laguma wareejin karo cid kale.

Macluumaadka Lacag Bixinta

Haddii lagu ogolaado Brograamka Kaalmada Khidmadda (Fee Assistance Program), waxaad u baahan tahay in aad bixisid khidmadda la jebiyay waqtiga diiwaan gelinta hawsha. Haddii ay jirto sabab aad la soo daahdid xisaabtaada, waxaa kaa lumi doono kaalmadaada.

Si aad u heshid macluumaad badan

Wac Adeegga Macaamilka Guddiga Nasashada iyo Beeraha Minneapolis (Minneapolis Park and Recreation Board Customer Service), telefoonka 612-230-6400.



Arjiga Kaalmada Khidmadda

Madaxa Reerka	Telefoon
Cinwaanka Jidka Magaalada <i>Minneapolis</i>	Zip Code
Cinwaanka Email	Calaamee sida aad jeceshahay in aan kula soo xariirno <input type="checkbox"/> Email <input type="checkbox"/> Telefoon <input type="checkbox"/> U.S. Mail
Arjiga Xarunta Qabashada Nasashada	Calaamee waxa loogu talagalay habka aad jeceshahay in laguula soo xariiro <input type="checkbox"/> Brograamka Daryeelka Cunugga Rec Plus (Rec Plus Childcare program) <input type="checkbox"/> Brograamyada Nasashada
Magaca hawsha aad dooneysid in aad iska diiwaan gelisid:	Maxay tahay khidmadda la bixiyo hawsha?

Sida waafaqsan Sharciiga Dhaqanka Xogta Dawladda Minnesota (Minnesota Government Data Practices Act), shaqaalaha nasashada Minneapolis Park and Recreation Board waxay ku ogeysinayaan in macluumaadka shakhsiga aan adiga iyo/ama adiga kaa codsanay foomkaan yahiiin gaar. Xogta gaarka ah waxaa heli kara adiga iyo shaqaalaha Guddiga Nasashada iyo Beeraha Minneapolis (Minneapolis Park and Recreation Board), ee u baahan in ay haystaan macluumaadkaan si ay u bixiyaan brograamka - ma heli karaan dadweynaha.

Buuxi jadwalka kuna soo dar dhamaan xubnaha qoyska kugu tiirsan ee jooga guriga.

Magaca Kowaad iyo Magaca Dambé	Da'da - haddii aad ka yar tahay 18 sanno

- Qor liiska dakhliga guud ee soo gala reerka sannadkii (dakhliga ka hor inta aan laga gooynin canshuurta). Ku dar dhamaan dakhliga (shaqada, xaqa, hawlgabnimada, Soshal Sekuritiga, masaruufka cunugga, kaalmada xaaska, iwm.)
\$ _____
- Ku lifaaq koobiyada xaqijinta dakhliga.

Saxiixa: Aniga waxaan caddeynaa in dhamaan macluumaadka kore yahiiin run iyo sax iyo in aan soo sheegay dhamaan dakhliga. Aniga waxaan fahamsanahay in aan si madax banaan u bixiyay macluumaadka si aan u helo kaalmada khidmadda MPRB. Aniga waxaan fahamsanahay in ay dhici karto in shaqaalaha MPRB xaqiijiyaan macluumaadkaan, iyo marka si ula kac loo maldaho macluumaadka kore, in taasi dhallin doonto in la joojiyo ka-dhaafidda khidmadda iyo diiwaan gelinta. Aniga waxaa fahamsanahay in aan mas'uul ka ahay in aan dabool Nambarka Soshal Sekuritiga ka hor inta aan gudbinin xaqiijinteyda.

Saxiixa Arjiilaha _____ Taariikhda _____

ISTICMAALKA XAFIISKA KELIYA		
Taariikhda la Qabtay ___/___/___	Caddeynta Meesha Qofka Daggan Yahay?	
Calaamee Hal: ___ Talo lagu ogolaado ka-dhaafi buuxdo	___ Talo lagu ogolaado ka-dhaafi buuxdo	
___ Loo diiday taasoo ku saleysan dakhliga ___ Loo diiday taasoo ku saleysan xaqijinta ___ Loo diiday taasoo ku saleysan foom qabyo ah		
Saxiixa Shaqaalaha _____	Taariikhda ___/___/___	Goobta _____
Saxiixa Maamulaha MPRB _____	Taariikhda ___/___/___	
Taariikhda la Diiday _____	Taariikhda la Qabtay _____	Taariikhda la Casriyeyay Hawsha _____